Warbixin Kooban (Executive Summary)

Minneapolis Park iyo Recreation Board aragtida ay u hayaan mustaqbalka waa mid lagu sii wadayo wax weligeed soo jiray oo lagu dhawrayo dhulka xoogana la saaro in dadka laga dhaadhiciyo in dhulka iyo dadka ay isku xiranyihiin uuna midba midka kale ku xiranyahay. Nidaamka beeraha nasashada ee Minneapolis waxa u sii dhisayaa hannanka lagu yaqanno magaalada iyo in kor loo qaado tayada heerka nolosha dadka deggan ayadoo la eegayo tayada beeraha lagu nasto laguna raaxaysto. Tilmaamaha xildhibaanka beeraha lagu nasto iyo fikradaha laga helo dadka meesha deggan, kuwa dalxiis ugu yimid, iyo masuuliyiinta la soo doortay ayaa soo hindisay hammi lagu hirgalinayo qorshe midaysan.

Ballanqaadka iyo Adeegyada Waxqabadka

2005, ballanqaad laba sano ah ayaa la sameyey si lagu dhammeeyo qorshaha midaysan. Shanta qaybood ee qaabka horumarinta ee qorshaha mideeysan waa:

- Wajiga I – Qiimaynta (Halkee maanta maraynaa?)
- Wagjiga II – Adeegyada Waxqabadka Degmada iyo Cilmibaarista (Intey yihiin dalabyada hadda jira iyo baahida loo qabo, maxaase laga ogyahay isbedallada soo socda?)
- Wajiga III – Horumarinta Qorshaha Midaysan (Comprehensive Plan Development) (Oo ku salaysan waxa la ogyahay, iyo maxay noqon karaan waxa laga rabo in ay noqdaan?)
- Wajiga IV – Gundhigga Mudnaanshaha Leh iyo Go'aan Gaarista (Setting and Decision Making) (Maxay noqon karaan mudnaanshaha tillaaboyinka muddada gaaban iyo muddada dheer ee maslaxadda danta guud?)
- Wajiga V – Hirgalinta (Maxay ahaan karaan ilaha lagu talajiro in loo qoondeeyo si ujeeddada lagu gaaro?)

Qorshahan midaysan waxa uu calaamad u yahay dhammaystiridda wajiga koobaad ee qaabka qoorshaynta. Qiyaastii 4,000 of qof ee meesha deggan, dakda dalxiiska ah, iyo masuuliyiinta la doortay waxbay ku kordhin karaan horumarinta qorshahan, iyo in shaqaale ka badan 100 qof ayaa ka qaybqaataan mid ama dhowrka waji ee habka qorshaynta midaysan.

Inta lagu jiro Wajiga I, kooxaha shaqaalaha ayaa soo ururinaya akhbaar ku saabsan warshadaha, istatiskada dadka deegaanka, iyo barnaamijyada iyo adeegyada. Koox waliba waxa ay xoogsaaraysaa dhisidad habab ama qalab si joogta ah dib loo casriyeen karo oo kor u qaadaysa awoodda hababka baaxadda beerta nasashada ay u isticmaalayso akhbaartan sababo la xiriira qorheynta mustaqbalka. Lix kooxood oo dheeraad ah ayaa loo dhisay in inta lagu jiro wajiga qiimaynta – akhbaarta tignolojiyada, xammilidda, qorshaynta, hawlaha adeegyada jaaliyadda iyo cilmibaarista, qiimaynta, iyo farshaxanka iyo taariikhda. In badan ee kooxahan ah waxa ay wax sii wadi doonaan waxa ka dambeeya qorshaha horumarinta. Xoogsaarka kooxahan waxa uu u dhaxeeya dhammeystiridda diiwaangelinta qalabka farshaxanka ee taariikhiga ah ee nidaamka beerta nasashada si ay uu u noqod mid xammili kara qorahaha horumarinta.

Marka Wajiga II la bilaabo dayrta 2006, hawlaha adeegyada jaaliyadda iyo kooxda cilmibaarista ay bilaabeen nidaam shacabka magaalada lagu siinayo, dadka beerahaha nasashada isticmaala, iyo xildhibannada xukumadda la doortay in ay fikradahooda la qaybsadaan beerta nasashada jaaliyadda iyo baahida raaxada. Nidaamka waxaa kamid ah buugyare su'aalo leh oo loo diray 172,300 guri ee Minneapolis, toddobada shirar oo magalada qabanqaabisay, labaatan kooxaxha xoogsaarka, saddex masuul ee jaaliyadda ee la magacaabay bandhigga shaqada, iyo istatistiko jirta ee sahan ahaan teleffonka dadka lagu wareystay. Ujeeddada waxa ay tahay in la ogaado waxa ay u baahanyihin beeraha lagu nasto kuwooda ugu waaweyn.

Kaddib marka si dhab loo dhegaysto loona falanqeeyo fikradaha soo gaaray, waxaa soo baxay baahida ugu weyn oo ay jaaliyadda qabto:

- Ay ku saabsanyihiin hawlaha sida tooska ah u saameeya caruurta iyo dhalinyarada
- Dhawrista iyo in wakhti lagu qaato jawiga bay'adda
- Horumarinta caafimaadka iyo jimicsiga jirka
- In beeraha la nadiifiyo si fiicanna loo dayactiro
- In beeraha nasashada noqdaan kuwo nabadgalyo leh

The Direction (JIHADA)

Inta lagu jiray labada waji, wakiillada ayaa ka qayb qaatay shirar hawlaha lagu fulinayo. Inta shirarka hawlaha socdeen wakillada waxa ay sharaxaan aragtidooda ku aaddan qaabka ay yeelan doonaan beeraha nasashada iyo himilada ururka uu matalayo iyo sida uu doonayo hawlaha in uu u wado. Jihada ay isla meeldhigaan waxaa lagu saleeyay naatijada ka soo baxday hawlaha adeegyada jaaliyadda iyo qaabka cilmibaarista. Talooyinka muhiimka waxaa kamid ah:

Ururka in uu ahaado mid isbixin kara
Marka la diyaarinayo habka ay hawsha uu qabanayso Minneapolis Park and Recreation Board, arrinka isbixinta waa midda ugu muhiimsan. Tan macnaheeda waxa ay tahay in in la qanciyo waxyaabaha ay wakhtigan u baahanyihiin beeraha lagu nasto iyo baahida raaxada ayadoon aan qalqal la galinin wax ay faracyada mustaqbalka imaan doona in ay helaan waxa ay u baahanyihiin ee u dheellitiran bay'adda, dhaqaalaha, iyo walwalka ay hantida maguurtada ka qabaan. Qorshahan midaysan waxa uu ku talinayaa horumarinta iyo qorshe ay hirgalintiisu isbixinayo iyo ayadoo la faahfaahiyo sida isbixinta ay qayb ahaan uga mid noqon karto hawlaha caadiga ah ee kamidka ah nidaamka beeraha nasashada

In la soo bandhigo dhir bilicda magaalada kordhisa, dhul dabiici ah, iyo biyo aan dhammanaynin oo soo jiidasho leh
Dhulka, dhirta ama geedaha, iyo biyaha—oo ah lafdhabarka u ah qaabka beeraha lagu nasto—waxa ay u bahaan yihiin maalgalin mudda dheer ah iyo waxa gacanta lagu hayo. Ayadoo la dhawrayo si ay magaalada oo dhan wax ugu tarto, dadka deegaanka deggan oo dhan dan baa ugu jirta in ay xil iska saaran mustaqbalka ilahan iyo in ay qaadaan masuuliyadda in ay hihiin maamulayaasha. Minneapolis Park iyo Recreation Board way ka go'antahay in ay hoggaamiyaan agaasinka ilaha dabiiciga ah, isku soo dhaweynta dadka iyo bai'addooda dabiiciga ah, iyo in ay muujiyaan dareen ah in ay yihiin maamulayaasha. Qorshaha waxa u sii tifatirayaa ujeeddoyinka iyo xeeladaha laga filayo in ay la imaadaan heer sare ee agaasiminta qaabka ilaha dabiiciga ah ee beeraha nasashada, mashruucayn isku xiraysa dadka iyo bai'aaddoda dabiiciga ah, ilaalinta iyo dhawrista geedaha jidadka ku safan, iyo horumarinta iskaashiga ah horey u dhigaya ujeeddadoyinka lagu difaacayo bai'aadda daabiiciga iyo dadka lagula xiriiriyo. Qorshaha waxa kale ee uu ku dhawaaqaya in si dhex-dheexaadnimo ah magaalada loogu qaybiyo bai'aadda dabiiciga ah, siiba in la xoogsaaro waqooyiga iyo waqooyi-bari ee Minneapolis.

Dadka la siiyo waxyaabo ay ku raaxeystaan oo niyadda u dhisaya horumar shaqsiyeed, caafimaad leh, iyo dareen bulshanimo
Mustaqbalka ayaa la raadinaya hoggaan dadka soo jiita in ay ka faa'idaystaan raaxada. Qorshahan, raaxada ah waxaa kamid ah hawlaha idil oo raaxada ka dhiga wakhti xiso leh, farxad leh, iyo shayadda niyadda u dhisaya. Waxaa inta sii dheer in qorshahan uu aqoonsanyahay faa'iidada iyo tayada nasashada ay yiihiin kuwa cajaa'ib badan, kuwaas oo kala ah barashada xirfado anfaca oo bulashada lagu dhisayo iyo kahortagga dambiyada. The Minneapolis Park iyo Recreation Board waxa ay iska xilsaareen in ay wax badan ku kordhiyaan nolosha shaqsiyaadka, qoysaska, iyo jaaliyado idil ayado kudayashoin ay ka dhigto meel laga helo wax dadka siiya waxqbad, farshaxanimo, bai'aad, iyo waxqabadyo ku aaddan

bulshanimada ee jaaliyadaha kala duwan ee magalada oo dhan ku nool. Qorshaha ayaa ka hadlaya horumarinta xarunta cusub ee adeegyada jaaliyadda oo u faa'idaysa xubnaha jaaliyadda, dadka siisa taakulayn naxariis leh iyo in si fudud ay u danaysa maslaxadda dadka hadda isticmaala noocan, iyo in ay dhigto meel uu mujtamaca isugu yimaado, iyo in ay tahay meel isbixin karta lana xiriirta xaruumaha dhexe ee jaaliyadaha. Qorshaha waxaa kale oo uu soo bandhigay ujeedoyin iyo xeelado taageraya caafimaadka iyo ujeedoyinka jirdhiska ee dadka deegaanka iyo xiriirinta dadka iyada oo la raxaysanyo.

In la dhiso beero lagu nasto oo xarakaadkoodu calaamad u yeela magaalo qancinsana baahida jaaliyadaha kala duwan

Marka uu isbadalaan jaaliyadaha kala duwan ee Minneapolis, Minneapolis Park iyo Recreation Board waa in ay dhisto beero lagu nasto iyo leh wax lagu raaxo qaato oo dabacsan, isbixinaya, iyo wax indhaha soo jiidanaya, iyo in dadka magaalada deggan ayu dareemi karaan in ay ayagu leeyihiin. Gaarista aragtidaan waxa ay u baahantahay in ururrada ay si taxadar leh u tixgaliyaan waxa loo sheego, diyaar u noqdan in baahi tiraan waxa mustaqbalka dhici doona, indha indheeyaan xeelado cusub, iyo in ay raadiyaan ilo cusub oo maalgaliya. Minneapolis Park iyo Recreation Board waxa ay si ahaan doonaan ku leh hoggaan xoog leh si ay si madax bannaan u xooga usaaraan beeraha lagu nasto iyo meelaha lagu raaxaysto, in la fidiyo abuuris magaalada lagu qurxinayo, iyo in la kaashaado ururro ka qaybqaata hawsha uu ururka qabanayo. Qorshaha ayaa looga hadlaya horumarinta beeraha lagu nasto deegaannada ay dadka ku soo badanayaan ama la filayo in ay ku soo bataan. Tan waxa ay adeegya siinaysa xaafadaha cusub ee la soo degayo ayadoo lo dhisayo beeraha lagu nasto oo waxkasta leh iyo in cawinaysa biriqda hore ee horumar cusub. Sidoo kale qorshaha waa uu tifatiraya baahida loo qabo in la xiro faraqa ka jira magaalada gebiahaanteeda, siiba waqooyiga iyo waqooyi-bari ee Minneapolis. Qorshaha waxa kale ee uu ka hadlayaa adeegyada iyo loo gaarsinayo hawlaha ujeedoyinka socda iyo kuwo cusub ayadoo la si fiican looga fikirayo tillaaba kasta. Tan waxa ay sahli kartaa in qaabka beeraha lagu nasto ay noqdaan kuwa ay ka imaanayso soo banghigaa meelo cusub, ayadoo meesha laga saarayo meelo duug ama kuwo aan sidaa loo istimalin, iyo iskaashi lala sameeyo bixiyaha adeegyada si ay u dhicin qalad horay u loo sameeyay.

In la helo meel dhawrsan oo ammaan leh laguna cayaaro, lagu dabaaldago, lagu nasto, laguna raaxaysto

Si beeraha lagu nasto looga dhigo kuwo ammaan leh waxa ay u baahantahay axdi mudda dheer qaadanaya ee dadka iyo beeraha lagu nasto ee ka socda Minneapolis Park iyo Recreation Board iyo kuwo badan oo ay kaashato. Ammaanka, mid jira iyo mid la filayo in uu jiro, waxa ay u baahantahay tillaaboyin lammana ee kahortagid iyo saxid wata. In si joogto loo soo gudbiyo beeraha lagu nasto ee nabadgelyo leh waa ay marka hore loo baahanyahay in beeraha lagu nasto ay ahaadaan kuwo laga shaqeeyo oo loo dhisay qaab ka hortagaya shil lama filaan ah. Minneapolis Park iyo Recreation Board waxa ay ballanqaadaysa in ay samayso doorashoyin lagu hubinayo amaanka iyo nafsadda dadka soo booqda iyo kuwa ka shaqeeya beeraha lagu nasto. Qorshaha ayaa dhahaya waa in la xoojiyo tillaaboyin kahortagis ah oo ka mid yihiin in la sii dhisayo cilaaqaadka lala samaynayo dadka beeraha lagu nasto soo booqanaya, la dejiyo xeerarka dhaqanka laga filayo inta la jiro beeraha lagu nasto, in shaqaalaha iyo kuwa soo booqdaba la siiyo tababar iyo in la dhiso beero lagu nasto oo qalabkooduna ahaado mid saafi ah.

Cilmibaarista

Qorshaha waxa uu aaminsanyahay baahida loo qabo in ururka uu noqdo mid darsa in uu qaabilo si uu u qanciyo isbadallada ka dhacayca beeraha lagu nasto iyo baahida raaxada ee degganayaasha Minneapolis. Jihoyinka lagu dhisayo qorshahan midaysan waxaa waday fikrado laga qaatay hawlaha adeegyada ee jaliyadda iyo qaabka cilmibaarista. Waxa kale oo waday garashada la xiiriirta isbadallada ka jira magaalada tan marki ugu dambasay la sameyay cilmibaaris baallaran, lana yiraahdo 1965 Brightbill Study. Isbadallada laga qabtay magaalada ee ugu muhiimsan mustaqbalka beeraha lagu nasto iyo helistooda waxaa kamid ah:

- Isbadalka meelaha ay dadka u badanyihiin: Tirada guryaha uu hal qof keligiis degganyahay waxa

uu kor uga kacay 27.6% sannadkii 1960 uuna gaaray 40% sannadkii 2000. Intii lagu jiray isla wakhtigaas, tirada guryaha leh caruurta waa uu hoos uga dhaceen 34.8 % ayaga oo noqday 25% ee guryaha. Magalada xitaa waxa ay noqotay mid aad u kala duwan haddana hoy u noqotay dad badan oo waddanka dibaddisa ku dhashay oo magaalada deggan.

- Halka ay nasashada ku wajahantahay: Dadka, siiba kuwa la yiraahdo Baby Boomers (oo dhashay wkahtiga u dhaxeya dagaalkii labaad iyo 1960) waxa ay yiihin kuwa raba muddo dheer in ay shaqeeyaan. Dhalinyarada ku soo koray jimicsi waxa iyana rabaan nolol firfircoon. Waxaa intaa sii dheer, danaynta habab ka duwaan kuwii dhaqanka iyo kor u kaca nashasho toosinta nafsadda u jeeda.
- Halka uu caafimadku ku wajahanyahay: Qaran ahaan, cilmibaaristu waxa ay na tusaysa in cayaalka iyo arrimaha caafimad darrada ee la xiriira iyo qarashka caafimadka ay kor u socdaan. Beeraha lagu nastana ay door weyn ka ciyaarayaan nolol firfircoon oo hoos u dhigaysa walwalka dhinaca caafimaadka taas oo xoojinaysa kahortagista caafimaad darrida

Himilada La Raacayo

Muraadka, aragtida, iyo waxa ay dadka aaminsayihin ayaa ah himilada **la raacayo** ee Minneapolis Park iyo Recreation Board. Erayadan waxaa lagu dabbaqayaa shaqada uu ururka wado ayadoo loo soo marinayo miisaniyadaha sanadeed, qorshaha shaqada, iyo qorshaha hirgalinta ee shanta sanadood. Horumarka la gaaro aragtidaan ee lagu so bandhigay qorshahan waxa lagu qiimaynayaa si shaqsiyan, si urur jira, iyo heer jaaliyad ah. Erayada hanuunista ah waa kuwa socda:

Erayga **muraadka** waxa uu tifatiraya sababta jiritaanka ururka:

Minneapolis Park iyo Recreation Board waxa ay weligeed dhawraysaa, difaacaysaa, haynaysaa, hagaajinaysaa, korna u qaadaysaa bai'adda dabiiciga ee magaalada, dhulalka lagu nasto, iyo fursadaha raaxada ee logu talagalay facaan iyo kuwa imaan doona.

Waxa aan u jirnaa si aan dadka oo dhan u siinno meelo ay isugu yimaadaan, kuna dabaaldegaan, kuna qabsadaan hawlaha, maskaxda ku dejiyaan, iyo in ay sameyaan xarakaad lagu horumarinayo caafimaadka, ladnaanshaha shaqsiga, bulshada, iyo bai'adda.

Qiimaha erayada waa aqoonsiga sida u uururka shaqada uu u qabto:

Isbixinta: La qanciyo baahida ka jirta beeraha lagu nasta iyo meelaha lagu raaxaysto ayaadoon aan hurin awooda ay facyada dambe ku qancin karaan si ay isku dheellitiraan bai'adda, dhaqaalaha, iyo walwalka hantida maguurtada ah.

> **Bai'adda:** Isbixinta iyo kor u qaadista dhulka lagu nasto, biyaha, dhirta magaalada lagu abuuray.
> **Dhaqaalaha:** La dajiyo nidaam lagu dhisayo misaaniyadda xasillon ee muudda gaaban iyo muddada dheer ee beeraha lagu nasto.
> **Hanti maguurtada:** Dadka deegaanka deggan oo idil la siiyo fursad ay ku hormariyaan tayada noloshooda iyo ladnaantooda ayadoo beraha lagu nasto iyo adeegyada lagu raaxaysto oo heer sare iyo ka turjumaya baahidooda qaaska ah.

Hoggan Aragti Fiican Leh: La xaqdhawro aragtida iyo hoogganka dhisay beeraha lagu nato iyo meelaha lagu raaxaysto iyo in la aqoonsado baahida joogtada ee loo qabo hoggaan leh waxqabad heer sare ah.

Ammaanka: Si amman ah loogu taagero shaqada bai'adda oo xowly u socota iyo waya aragnimo heer sare ah ee dadka dalxiiska u yimid.

Tixgalitna iyo Fikradaha Cusub: diyaar loo ahado in la bixiyo jawaabo laga soo fiirsaday u daneeya baahida ay qabaan jaaliyadaha kala duwan ee magaalada ku nool, si joogta ahna la raadiyo siyaabo sida ugu fiican loogu soo bandhigayo beraha lagu nasto iyo adeegyada lagu raaxaysto.

Madaxbannaani iyo Xoogsaarid: Madaxbannanida waxa fursad ay fursad u siinaysa Minneapolis Park iyo Recreation Board in ay xoogsaaraan bixinta iyo helista ilaha laga maarmaanka u ah si ay ku gaarto muraadkeeda iyo u dhisto iskaashi leh waxqabad iyo masuuliyad.

Eradayad **aragtida** waxa ay ka warbixinayaan himilada ururka ee ku aaddan marka laga gaaro 2020:

2020, nidaamka beeraha lagu nasto ee Minneapolis waxa ay noqonayaan meesha koobaad ee lagu dhaweeyo laguna soo jiito dadka deegaanka iyo dadka dalxiiska. Nidaamka beeraha lagu nasto iyo bilicdeeda waxa ay qayb ahaan uma mid yihiin nolol maalmeedka iyo jaanta lagu yaqaanno Minneapolis. Ilaha dabiiciga, dhaqanka, farshaxanka iyo nasashada waxa ay ka abuuran waaya aragnimo, caafimaad, carrogadis, raaxo, iyo barashada dadka oo dhan. Beeraha lagu nasto waa kuwa isbixiya, oo sii fiican loo waanajiyo iyo ammaan ah, oo qancinaysa baahida shaqsiyaadka, qoysaska, iyo jaaliyadaha. Xoogsaarka lagu dhawrayo dhulka waa mid soconaya, iyadoo si adag wax looga qabanayo in dadka lagu xiriiriyo dhulka iyo in iyaga la wada xiriiriyo. Iyaga oo la socda qiimaha noloshooda, dadka deegaanka waxa ay u hanweynyihiin hoggaanka iyo waxa ay taagerayaan hawyha culus ee maamulka raaxada.

Ballaanqaadista
Qorshahan waxa uu soo dhaweynayaa waxa cusub iyo waxa uu u baahanyahay in la sii wado barashada Minneapolis Park iyo Recreation Board ay ka bixiyaan beerahaha nasashada iyo adeegyada raaxada ee ugu fiican ee la siiyo dadka deeggan iyo kuwa dalxiilka u immada Minneapolis. Guusha aragtidaan waxa ay ku xirantahay in si joogta oo Park Board ay wax iska xilsaaraan, iyo qiimaha meelaha ay dadka ku nastaan oo lagu haynayo iyo lagu hagaajinayo maamulka beerahaha lagu nasto ee Minneapolis.

Ayado oo la haysto hogaanka qorshaha, dadka deegaanka deggan iyo dadka dalxiiska ugu yimaada beeraha lagu nasto waxa ay filan karaan mustaqbal farxad leh kuwaso adeegyada ay yihiin kuwo si joogto ah loo habeeyo iyo loo qanciyo baahida jaaliyadda, hagaajinta qalabka, isku xirka bai'adda dabiiciga, lana fidiyo hawlaha isbixinta, iyo in beeraha lagu nasto ay cid kasta ammaan u yihiin.